



KOOXDA IDG EE DMCC




120 Emarat Atrium Building, Sheikh Zayed Rd, PO Box 50784, Dubai, UAE

SIYAASADDA ANSHAXA

Agoosto 2016



KOONTAROLKA NOOCA

NOOCA	LA SOO SAARAY	MUALIF	WAXAA IN LA SHAACIYO AMRAY
1	AGOOSTO 16	G WINTER	I GORDON
2	AGOOSTO 17	G Winter	G Winter 
3	SITEEMBAR 17	G Winter	G Winter 
4	JANAAYO 20	G Winter	G Winter 





TUSMO

TUSMO	1
SIYAASADDA KU AADDAN CABASHADA.....	2
1. Baaxadda	2
2. Badbaadada.....	2
3. Ammaanka	6
4. Qarsoodi iyo Ammaanka Xogta.....	6
4.1. Warbaahinta Bulshada iyo Isku Xirka Bulshada	7
5. Heerarka Anshaxa iyo Aadaabta	2
5.1. Waxyaabaha ugu muhiimsan in la sameeyo iyo waxyaabaha ay tahay inaan la samayn	3
6. Anshaxa	4



SIYAASADDA ANSHAXA

1. Baaxadda

Siyaasadda soo socota waxay dejisaa heerarka ay ka filayaan Shirkadda iyo Agaasimaha Maareyntu dhammaan shaqaalaha IDG. Siyaasadda ayaa ah mid laga soo qaatay Buugyaraha Shaqaalaha kaasi oo la siiyo dhammaan shaqaalaha markii ay ku soo biirayaan shirkadda laakiin waxay ku saabsan tahay heerarka anshaxa iyo habdhaqanka wanaagsan ee la filayo.

Siyaasadda Anshaxu waxay ku salaysan tahay dukumiintiyadii dhowr ah kuwaasi oo shaqaaluhu u arki karaan muhiim in la fahmo – waxaa laga yaabaa inaad door biddo inaad weydiiso maareeyahaaga gaarka ah haddii aad danayneyso. Dukumiintiyadaasu waa:

- Anshaxa Caalamiga ah (ICOC) - <https://icoca.ch>
- Is'haysiga [yacni Midnimada] Caalamiga ah ee QM (UNGC) - <http://www.unglobalcompact.org.uk>
- Mabaadiida Iskaa Wax u Qabso ee Ammaanka iyo Xaquuqul Insaanka (VPSHR) - <http://www.voluntaryprinciples.org>
- Sharciga Habdhaqannada Ajnabiga iyo Musuqmaasuqa (FCPA) (USA) - <https://www.justice.gov/criminal-fraud/foreign-corrupt-practices-act>
- Sharciga Laaluushka Looga Hortago (UK) - <https://www.legislation.gov.uk/ukpga/2010/23/contents>

2. Mabaadiida Anshaxa ee IDG

IDG waxay aad isugu qaddarisaa heerarkeeda anshaxa. Si taasi loogu guuleysto waxay u baahan tahay in qof kastoo shaqaalaha IDG ka tirsan, iyo dadka haysta qandaraas hoosaadka ee aan la shaqeyno, inay ku dhaganaadaan heerarka anshaxa ee ugu sarreeya. Heerarkeeda anshaxu waxay ku salaysan yihiin codsiga iyo u hoggaansamidda Xaquuqul Insaanka asaasiga ah iyo Xaquuqul Insaanka caalamiga ah ee dadka oo idil. Waa mabaadiida:

- Xaqa loo leeyahay in la noolaado
- Xaqa loo leeyahay xorriyadda dhaqdhaqaaqa
- Xorriyatul qowlka iyo in loo kulmo si nabad ah

IDG innaba uma dulqaadan karto:

- Addoonsi, ku xamaalasho iyo qofkoo shaqo qasab ah la galiyo, carruurta oo lagu shaqeysto iyo dadka oo laga ganacsado
- Dhibaateyn iyo xoog sheegasho
- Ku takrifalid dhanka galmada ah iyo xadgudub





- Musuqmaasuq
- Takoor (ka dhan ah sinnaanta, ka dhan ah kala duwaanta oo si wacan loo adeegsado iyo si ka dhan ah ka qeyb galinta)

Dhammaan mabaadiidaas waxaa lagu qeexay Siyaasadaha IDG kuwaasi oo ay heli karaan dhammaan shaqaalaha heer kasta waxaana meesha loogu soo daray sidii inay yihiin xirmooyinka xogta ee shaqaalaha.

3. Heerarka Anshaxa iyo Adaabta

Waa inaad ogaatid, aad fahamtid oo aad raacdid mabaadiida anshaxa ee IDG (ee sare ku xusan).

Waxaa lagaa filayaa inaad tilmaamaha u raacdo si waafaqsan qandaraaskaaga shaqada.

Waa inaad qaban wax hawl ah oo aan lagu xusin qorshaha ama siyaasadda caymiska ee shirkadda.

Waa inaad taqaano sharciyada maxalliga ah ee munaasabka ah iyo sharuudaha macmiilka Shirkadda.

Waa inaad xaqiijiso inaad ogaato oo aad fahamto awaamiirta shaqada, awaamiirta ilaalinta, awaamiirta dabka, qorsheyaasha wax u istaagidda ama wax u diyaar garoobidda iyo kuwa arrimaha kadiska ah, Habraacyada Tillaabo Tillaabada ah ee Shaqooyinka Soo Noqnoqda ee Shirkadda, sharuudaha isticmaalka awoodda (RUF) iyo awaamiirta iyo tilmaamaha kale ee ku haboon goobtaada shaqada.

Waa inaad sida ugu dhaqso badan ee ugu macquulsan adoo isticmaalaya habka ugu dhaqso badan ugu sheegto taliyaha kooxdaada, maareeyaha Mashruuca, Agaasimaha Shirkadda ama Maareeyaha haddii ay kugu dhacdo dhibaato dhanka maamulka, daryeelka ama shaqada ah, adoo siinaya faahfaahin buuxda oo sax ah.

3.1. WAXYAABHA UGU MUHIIMSAN IN LA SAMEEYO IYO WAYAABHA AY TAHAY INAAN LA SAMAYN

- Baro luuqadaha meesha looga hadlo inta ugu badan ee aad awooddo.
- Horumari sida aad ugu hadasho Ingiriiska.
- Noqo qof daggan oo bulshay ah.
- Mar kasta imoow waqtigii la rabay.
- Soo koob talada aad bixineyso.
- Noqo qof wax laga codsan karo.
- Dhiiri gali shaqo kooxeed.
- Xushmee sharciga maxalliga ah iyo caadooyinka maxalliga ah.
- Noqo qof indha dheer oo geyfan.
- Noqo qof si qurxoon u labista DHARKUNA SI FIICAN HAKUU LE'EKAADAAN.



WAYAABHA AY TAHAY INAAN LA SAMAYN

- Ha adeegsan luuqad xad gudub ah
- Ha isku qancin wax aan jirin.
- Haka hadlin siyaasad, diin ama qolo.
- Haku lug yeelan khilaafaad maxalli ah.
- Ha ogolaan habraacyo aan ogolaansho loo heysan.
- Ha ogolaan wax xadgudub ah oo ka dhan ah sharuudca.
- Ha ogolaan gaadiidka mashruuca in loo isticmaalo qorsheyaal aan waafaqsanayn mashruuca.
- Dadka ha ka soo qaadin inay wax ogsoon yihiin (ee mar walba hubi).
- Ha ka baqin inaad saxdo shaqaalaha kaa darajo hooseeya.
- Ha noqon qof jirkiisu uusan dhisnayn.

4. Anshaxa Wanaagsan

Anshaxa Wanaagsan ee Shirkadda waxaa lagu muujiyay si garaaf ah bogga xiga. Waxaan ku kalsoonahay in tani ay ka dhigan tahay qiyamyada iyo heerarka anshaxa ee lagaaga baahan yahay inaad dhowrto oo aad sare u qaaddo.





5. Badbaado

Wajjibaadka ammaanka wuxuu noqon karaa mid soo noqnoqda waxaana uu horseedi karaa in lagu caajiso. Gefnaan la'aan waa cadawga ammaanka. Xil qaadiid qurxoon, geyfan, oo xirfadeysan waa hubka ugu horreeya ee kujira kaydkaaga hubka wuxuuna u dirayaa cadawga badankiisa meel kale si ay usoo helaan bartilmaameed kale oo ka fudud meesha aad joogto.

Iska ilaali cimilada iyo biyaha dalkaaga ee aad ku dhex shaqeyn doonto oo xaqiiji inaad leedahay dhar ku habboon xilli kasta haddii loo baahdo. Nadaafad shakhsi oo wanaagsan, jirka oo had iyo jeer la dhiso, in caafimaadkaaga aad u dhowro si wanaagsan, aadna cabto biyo kugu filan aad ayay muhiim ugu tahay waxtarka Dalal badan ayaa wajahaya khatar ka imaanaysa miinooyin dhulka lagu aasay, marka mar walba ka taxaddar shaqada.

meesha aad ku dul socoto iyo meesha aad gacmahaaga saareyso.

Ka fogow inaad ku qubeysato ama aad ku dabbaalato webiyada haddii ay macquul tahay. Webiyada ayaa waxaa laga yaabaa inay leeyihiin hirar xooggan ama laga qaadayo cudurro ama ay ku dhex jiraan xayawaanno khatar ah. Haddii ay qasab noqoto inaad soo booqato oo aad isticmaasho webi, ugu yaraan hal qof oo kale wado.

Waxaa lagu talinayaa in warqad lagu soo dirayyo siyaabe laisku hallayn karo ama in loo soo gudbonaayo maareynta IDG ama PM si looga soo diro xarun lagu kalsoonaan karo.

Waxaa ugu wanaagsan inaad uga tagin alaabadaada qiimeha badan meesha jifka mana ahan wax ku ool inaad wax walba qaadata had iyo jeer. Haddii aad haysato lacag badan ama dahab (ayadoon loo badinayn) aadna dareemeyso in ammaanku uusan wanaagsanayn, marka waxaa lagugula talinayaa inaad la dhigato maareynta IDG ama PM. Aad had iyo jeer u dhowr ammaanka dhammaan alaabadaada.

6. Ammaanka

Ammaanku waa shaqadeena waana kugu QASAB inaad ka fakarto "Ammaanka" mar WALBA. Mar kasta feejignow, xataa markii aadan shaqeyneyn. Mar kasta dareen qab oo qof ammaanka horumarintiisa danaynaya ahaaw. Waligaa wax 'rahan' ahaan meel ha u dhigin. Xasuusnow maahmaahdii Nepali: "**Mukhma 'Ram Ram', bhaguli ma chhuri cham!**" Weligaa su'aal wax ka wydii oo hubi.

7. Qarsoodi iyo Ammaanka Xogta

Ammaanka Shaqada iyo kan Ganacsigu waxay u baahan yihiin inaad daryeelka ilaaliso markii aad isticmaaleyso dhammaan nidaamyada isgaarsiinta. Fashilka amniga hawlgalka naftaada ayuu galaafan karaa. Habacsanaanta amniga ganacsiga waxaad ku waayi kartaa shaqadaada.

Wixii xog ah oo afka laga sheego ama qoraal ah oo ku saabsan shirkadda ama hawlaha shirkadda waxaa ku jiri kara wixii la keydiyay, la gudbiyay, ama la arki karo markii lagu gudbiyo wada sheekeysiiyo taleefan ama farriimo, emaillo, adeegyada farriimaha ee elektaroonigga ah, xog kumbuyuutar lagu keydiyay iyo *falaash dhiski*, dukumiintyo, galal iyo qoraallo.





Aad uga taxaddar waxa aad ku gudbiso taleefannada gacanta. Mar walba u qaado in qof kale uu dhageysanayo. Internetka iyo emallada wixii lagu gudbiyo waxaa la socda dawlado, kuwaasi oo qaarkood xiriir saaxiibtinimo la laahaan karaan argagaxiso.

- Ka taxaddar wixii aad ku qorto emaila iyo farriimaha elektaroonigga ah
- Ka taxaddar emallada ka imaanaya ilo wareedyo aan la garanayn kuwaasi oo kugu casuumaya inaad kasoo jawaabto, inaad xog bixiso ama xataa inaad lifaaqyo furto.
- Wax kale ha ku samayn emallada ka imaanaya ilo wareedyo aan la aqoon laakin tir un kuna wargali qof jago ahaan kaa sarreeya.
- Ha usii gudbin emallada ka imaaday ilo wareedyo aan la aqoon dad kale oo Shirkadda ka tirsan maadaama ay wadan karaan fayras ama *spyware* oo sidaasi aad ugu sii gudbin karto.
- Ha dirin emaillo ku casuumaya shaqaalaha Shirkadda inay kusoo biiraan shabakado ama kooxo sheekeysii adigoo marka hore dadka ogeysiin inaad ku casuumi doonto.
- Iska indho tir casuumaadka ku saabsan inaad kusoo biirto kooxo kuwaasi oo laga helay qof un haddii qofkaasi uusan kuu soo digin mar hore oo uusan kugu soo wargalin inuu kuu soo dirayo casuumaad aadna ogsoon tahay in ay dhab tahay ayna ka socoto qofkaas.

7.1. Baraha Bulshada iyo Isku Xirka Bulshada

Siyaasaddaan waxay bixisaa talo loogu tala galay u adeegsiga baraha bulshada iyo teknoolojiyadda/adeegga isku xirka bulshada. Waxaa ku jira baloogyada, macluumaad, baloogyo yaryar, bogag ka tirsan bar internet, qolalka wada sheekeysiga, warqado war xambaarsan oo elektaroonik ah, fagaareyaal internetka ah, baraha isku xirka bulshada, iyo baro kale iyo adeegyo u saamaxa dadka inay la wadaagaan dad kale xog.

Waxay IDG u aragtaa Baraha Bulshada iyo adeegyada Isku Xirka Bulshada kuwo caadi ah iyo inay yihiin wax muhiim ah oo qeyb ka ah noloshu bulshada iyo arrimaha guriga ee shaqaalaheeda. Waa siyaasadda IDG in aaladahaan loo tixgaliyo inay yihiin kuwo ku habboon qorsheyaasha shakhsiga balse aysan u habbooneyn u adeegsiga xirfadlenimo ee gudaha IDG: waxay ku jiraan khatar aad u weyn oo ah dhanka ku xad gudbidda ammaanka shaqada.

IDG waxay ku kalsoon tahay tayada shaqadeena, waxayna aad ugu kalsoon tahay shaqaalaheeda: laakiin ma ahan wax aan ku faanfaanno, wax aan xayeysiino ama aan dadka u sheegno. IDG waxay ka hawl gashaa deegaanno xaalad adag kujira oo khatar ah, ayadoo bixisa adeegyo ammaan oo ay siiso macaamiisheeda, marka waxaa nalaka filayaa inaan bixinno heerarka ugu sarreeya ee ammaanka. Waxaa arrinkaan kujira dhimidda fursadaha wixii ku xadgudbid ah oo ka dhan ah amniga shaqada. IDG marka waxay u baahan tahay siyaasad xukunta baraha Bulshada oo adag oo ay tahay in la adeegsado.

Labo sharci oo aasaasi ah ayaa ku taxaluqa:

1. Ha caawin cadaw adoo siinaya wax xog ah, yaraan kasta ha u muuqatee.
2. Aamusnaan waa difaaca ugu wanaagsan, iyo difaacidda dadka aad wada shaqeysaan. Naftaada bartilmaameed ha ka dhigin.



Waxaa lagaa doonayaa inaad dhinto 'soo galidtaankaaga khatka internetka' oo aad ka dhigto inta ugu yar ee ugu macquulsan markii ay timaado dawrkaaga ah gudaha IDG. Sida ugu habboon, waa inaysan qofna u ahaan macquul inuu kuu garto inaad tahay shaqaale ka tirsan IDG; inaad ka shaqeyso amniga; meesha aad ka shaqeyso; ama waxa aad qabato.

Waa inaad daabacin wax xog ah oo qoraal ama sawirro ah oo ku saabsan dhinac un ay leedahay IDG, hawlaheeda, ama hawlaha macaamiisheeda. Tani macnaheedu waa masawirro, fiidiyowyo, sawirro gacmeed, faallooyin, xog cusub, iwm, si kastoo inay yar yihiin ay kuugula muuqdaan ama inaysan waxba dhimayn.

Haddii warbaahinta bulshada aad si gaar ah u isticmaaleyso oo aad aragto khalad, dhalliil ama eedeeyn ka dhan ah IDG, ha isku dayin inaad ka jawaabto, xataa haddii arrinkaasi lagu sixi karo jawaab degdeg ah: xaaladahaasi oo kale haddii ay dhacaan waa inaad kusoo wargaliso Maareeyaha Dalkaasi Shirkadda u Qaabilsan kaasi oo go'aamin doona tillaabada ku habboon haddiiba ay dhacdo in tillaabo la qaado.

